



Niitty – Horumarinta Qaab Tababar Qoys
ee Ku saleysan Dadka isku Heerka ah oo
loogu talagalay Soo-galootiga

GOORMEE ISBITAALKA LOO AADAA FOOL DARTEED?

Milloin lähteä synnyttämään?



Haddii uu uurkaagu si caadi ah u hormaray, waa inaad isbitaalka u aadaa fool darteed haddii ay dhacaan mid ka mid kuwaan soo socdaayi:

- Waxaad dareentaa calool majiir AMA
- Biyahaaga ayaa dillaaca

Calool majiir joogto ah micnaheedu waxay tahay:

Calool majiirkaaga wuxuu soconayaa illaa **2 saac**, waxaa la dareemaa **5 daqiiqo oo kala fog** majiirkana wuxuu joogaa qiyaastii 1 daqiiqo halkii wakhtiba.

Deg-deg ma jiro, wakhtigaaga waxaad ku qaadan kartaa guriga oo waadna sugi kartaa inta uu calool majiirku ka soo xoogeysanaayo. Ka hor intaadan aadin isbitaalka sug illaa calool majiirka uu ka gaarayo heerka kor lagu xusay amaba aad bilowdo inaad dareento dhibaato.

Sidee loo dareemaa calool majiirka?

Calooshaada waqti yar ayey waxey noqoneysaa mid adag

Darreen carriiri ah ama darreen culays gudaha caloosha ah

Xannuunka wuxuu u eegyahay midka xilliga dhiigga caadada oo kale

Kaliya calool majiirada xannuunka ah ayaa ah calaamadda foosha! Ka hor calool majiirka dhabta ah waxaa laga yaabaa inaad dareento xoogaa fool aan xannuun lahayn oo been ah oo loo yaqaano calool majiirada Braxton Hicks.

5 MINUUTTIA



Biyahaaga ayaa dillaaca

Dareeraha amniotika ee caadiga ah waa mid cad ama guduud xigeen ah, waxaana laga yaabaa iney noqoto kaliya wax yar ama wax badan oo hal mar ah.

Badanaa calool majiirka wuxuu ku bilowdaa saacado gudahood marka ay soo daataan biyaha.

Marka ay biyahaaga dillaacaan, la xirriir qeybta deg-degga ee isbitaalkaaga hooyada si aad u hesho tilmaamo.

Badanaa hooyooyinka waxay isbitaalka fool darteed u aadaan inta lagu guda jiro 12 saacadood kadib marka ay biyaha dillaacaan.

Xaaladahaan soo socda waa kuwa laga soo reebayo oo waana inaad isla markiiba aaddaa isbitaalka:

Dhiig ka yimaada xubinta taranka.

Canuga ma dhaqaaqayo amaba wax yar ayuu dhaqaaqaa. Dareeraha amniotika waa mid cagaar ah ama dhiig uu ku jiro.

Hooyada ayaa ku sugan xannuun joogto ah oo darran. Hooyada ayaa waxaa ku soo baaday xannuun darran, sida madax xannuun ama cuncun darran.

Haddii aad wax ka walwaleyso amaba aad qabto su'aalo, fadlan la xirriir xaruntaada caafimaadka hooyooyinka ama qaybta xaaladda deg-degga ee daaweeynta dhanka dhalnada ee goobtaada!



Mashruuca Niitty 2018 illaa 2020

<https://projects.tuni.fi/niitty/>

Maamulaha Mashruuca Irmeli Nieminen.

Iimeeyl: irmeli.nieminen@tuni.fi

Takhasuse Anna Aikasalo. Iimeeyl: anna.aikasalo@tuni.fi

Takhasuse Jasmin Kaljadin. Iimeeyl: jasmin.kaljadin@tampere.fi

Ilaha iyo macluumaad dheeraad ah:

Degmada Isbitaalka Pirkanmaa. Synnytyksen käynnistyminen.

Waxaa laga heleyaa: [https://www.tays.fi/fi-fi/raskaus_ja_synnytys/
Synnytys/Synnytyksen_kaynnistyminen](https://www.tays.fi/fi-fi/raskaus_ja_synnytys/Synnytys/Synnytyksen_kaynnistyminen)

Sawiro: Mashruuca Niitty / Johanna Muurinen, Jaamacadda

